

## Ku soo dhowow barbaarin-horaadka

Bilaabidda barbaarin-horaadku isbaddal wayn ayuu u yahay qoyska oo dhan waxaana laga yaabaa filasho iyo dareemo kala duwan arrinkaas laga qabo. Muddada la qabsiga ee ilmaha waxaay ujeedadiisu tahay in ilmaha iyo qoyska la siiyo fursad ay kula qabsadaan nololmaalmeedka cusub.























Waxaan ku talinaynaa in ilmuhu uu la qabsado nawaaxiga cusub maalmihiisa hore iyadood la socotaan. In uu ilmuhu barashada hore la qaato waalidkii ama qof kale oo wayn oo u dhow waxaa la suuro galin karaa xattaa kahor intaan go'aanka barbaarin-horaadka la hirgalinin. Ilmuhu kaligii ayuu xanaanada sii joogi karaa isaga oo aanan waalidkii la joogin marka go'aanka barbaarin-horaadka la hirgaliyo.

Muddada la qabsiga ilmuhu waxaa uu baranayaa shaqaalaha, carruurta kale ee kooxda ku jira, waxqabadka iyo goobta. Shaqaaluhuna waxaay isla markaas fursad u haystaan inay ilmaha la yeeshaan xidhiidh wax iswaydaarsi fiican leh oo uu ku barto. Muddada la qabsiga waxaad ka qaybqaadanaysaan waxqabadka idinka oo la ciyaaraya, bannaanka la joogaya, la cuntayna iyo idinka oo nasiimada maalinimada la qaadanaya ilmaha.

Muddada la qabsiga ama horteed shaqaalaha ayaa idiin qabanaya ballanta wadhadalka hore ah. Wadhadalkaas waxaa ay ujeedadiisu tahay in macluumaadka ilmihiiina ku saabsan an isla dul marno, waxaa ad filaysaan iyo waxaa ad rajaynaysaanna inaan ka wada hadalno. Waxaad helayaan macluumaad waxaanad na waydiin kartaan su'aalaha barbaarin-horaadka, waxqabadka kooxda iyo jadwalka maalinlaha.

Barbaarin-horaadka cunuggu waa waxqabad lacag ah, lacagta la bixinayana waxay sida uu qabo sharciga bixinta lacagaha ee macaamiishu ku salaysantahay macluumaadka dakhliga. Marka uu cunuggu billaabo barbaarin-horaadka, waa in uu qoysku labo todobaad gudhood ku soo gudbiyaa warbixinta dakhliga soo gaala. Haddii aan warbixinta dakhliga la soo gudbin, waxaa lagu soo dallacayaa lacagta ugu badan. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan bixinta lacagaha waxaa laga helayaa bogagga shabakadda hel.fi, iimaylka varhaiskasvatus.maksut@hel.fi ama telefoonka 09 310 8600.

## Tusaalaha muddada la qabsiga ee ilmaha

Today	Monday	Monday	Monday	Monday barbaarin-horaadka - barbaarin-horaadka - go'aanku	Monday barbaarin-horaadka - barbaarin-horaadka - go'aanku wuxuu hirgalay
Ciyaar 					
Bannaa 					
Qado 					
Nasiimada 					
Wakhtig 					



## Bilaabidda lagu guulaysanayo ee barbaarin-horaadka waxaa si wadajir ah loola qorsheynayaa shaqaalaha.

**Ilmaha** waxaa loo suuro galinayaa in uu si badbaado ah u barto nawaaxiga ku cusub isaga oo waalidkii ama qof wayn oo u dhow la socda. Wuxuu helayaa sasabaadda iyo garabsiinta shaqaalaha. Waxaa la dareensiinayaa in lagu soo dhawaynayo kooxda wuxuuna wadan karaa alaab lagu ciyaaro oo u muhiim ah ama sawir dadka u dhoow ah.

### Mas'uulka

- si wadajir ah ayuu ula qorsheynayaa shaqaalaha muddada la qabsiga ee ilmaha baahidiisa ku habboon
- si wadajir ah ayuu ula baranayaa ilmaha kooxda carruurta iyo shaqaalaha
- warbixin ayuu ka siinayaa shaqaalaha nololwanaagga iyo badbaadada ilmaha arrimaha muhiimka u ah
- wuxuu su'aal ka keenayaa waxyaabaha uu su'aasha ka qabo ee barbaarin-horaadka iyo waxqabadka kooxda ku saabsan

### Shaqaalaha

- wuxuu qabanqaabinayaa muddada la qabsiga lagu jiro ama kahorba wada hadalka hore ee waalidka
- wuxuu baranayaa oo uu dhisayaa kalsoonida ilmaha iyo waalidka
- wuxuu ka caawinayaa ilmaha in uu ku biiro kooxda oo uu falanqayn karo dareenkiisa xun
- wuxuu warbixin ka bixinayaa qaababka iswaydaarsiga warbixinta, wadashaqaynta iyo waxqabadka kooxda
- wuxuu warbixin ka siinayaa waalidka maalinta ilmaha oo uu ugu gudbinayo qaabka lagu heshiiyay
- waxaa ka saaran mas'uuliyadda ilaalinta xogta arrimaha ku saabsan ilmaha iyo qoyska